



21,000+
Arday

107
Lugadood



**ARDAY
KASTA:
CODKA.
RIYO.**



**MUSTAQBAL
WANAAGSAN.**

DUGSIYADA BULSHADA FEDERAL WAY
QORSHAHA ISTIRAATIJIGA EE, 2021-2025



**KU DHAWAAT
3,000
SHAQAALE**

**35
AAGGA SQ MI
LAGA ADEEGAA**



**37
DUGSI**

AWOOD AAN XADDIDNAYN

Waxaa **sharaf iyo mudnaan noo ah ku dhawaad 3000 oo shaqaalaheena ah** inay u adeegaan ardaydeena, qoysaskeena, iyo bulshada hodanka ah ee kala duwan oo ka kooban Federal Way Public Schools. Waalidiinta, daryeelayaasha, iyo xubnaha bulshadu waxay noogu tiirsan yihiin inaan si weyn ugu daryeelno khexyraadka ugu qaalisan – carruurteena. **Arday kasta oo ku nool degmadeena wuxuu keenaa awood aan xaddidnayn, hadiyado, iyo hibooyin.** Shaqaale ahaan, waa **mas’uuliyaddeena** inaan u aburno shuruudo ay ardaydeenu wax **ku bartaan, ku bararaan, kuna guuleystaan.** Waxaa naga go’an inaan siinno arday kasta halbeeygo adag oo ku saleysan, waxbarid dhaqan ahaan wax ku ool ah, iyo hubinta in **la arko, la qiimeeyo, la maqlo,** oo ay **dareemaan macna xooggan oo ka mid noqoshada** dugsiga.

Waxaa na hagaya Qorshaheena Istiraatiijiyadeed, waxaan sii wadi doonaa inaan ardayda udhigno meel dhexe dhammaan go’aannada, kor u qaadno codkooda, taas oo hubin doonta

MUSTAQBAL WANAAGSAN EE LOOGU TALAGALAY ARDAY KASTA

Dr. Dani Pfeiffer, Kormeeraha guud



HAWSHEENA

Jawiga filashooyinka sare, taageero sare, iyo maraan marsiiyo la’aan, shaqaalaha Federal Way Public Schools waxay si joogto ah wax u baran doonaan, u hoggaamin doonaan, uga faa’iidaysan doonaan xogta, una wada shaqayn doonaan si loo hubiyo in ardaydeenu yeeshaan cod, riyo, iyo mustaqbal WANAAGSAN.

AFAR TIIR

Afarteena tiir waa bulukeetiya dhismaha ee shaqadeena oo ka wakiil ah dhamaan ardaydeena. Tiirasha waa awoodaha aan u baahanahay in aan si joogto ah u horumarino si loo kobciyo waxbarasho wax ku ool leh iyo dhismo hay’adeed karti-hawleed iyo awood-siin leh.

1

WAXBARIDDA & BARASHADA DHAQANKA OO-WAFAQSAN HALBEEGYADA

Tiirkayaga ugu horeeya wuxuu kusaabsan yahay **BARIDDA & BARASHADA**, shaqada ugu muhiimsan ee ururkeenna. Waxaan xaqiijin doonaa in ardaydeena oo dhan ay helaan manhaj adag, oo caadiga ah, iyo istiraatiijiyadaha waxbarida wax kala bixiyay si loo daboolo baahiyaha waxbarasho ee shaqsigu arday kasta. Dhaqankeena waxbarashada wuxuu ku turjumi doonaa ka hor aqoonta ardaydeena iyo asalka dhaqamada iyo luqadaha.

2

CIMILADA NABDOON IYO XIRIRO XOOGGAN OO LALA YEESHO QOYSASKA IYO BULSHADA

Tiirkayaga labaad wuxuu aqoonsan yahay in **“DUGSIYADU KELIGOOD MA SAMAYN KARAAN.”** Sidaa darteed, waxaan habsiin doonaa waalidiinta, daryeelayaasha, iyo bulshada Federal Way oo dhan shurako muhiim ahaan ee waxbarasho ardayda oo dhammaan. Waxaan kobcin doonaa kalsooni iyo ixtiraam labada dhinac ka dhexeeya bulshada guriga-dugsiga iyada oo loo marayo masuuliyad la wadaago si loo gaaro guusha ardayga, isgaarsiinta firfircoon, iyo codka daneeyaha oo macno leh.

3

WAX KU OOL AH, DARYEEL LEH, MACALLIMIIN KARTI U LEH DHAQANKA, HOGGAAMIYAYAASHA & SHAQAALAHA

Tiirkeena saddexaad wuxuu diiradda saaraa **MAALGASHIGA DADKA.** Waxa ay xoogga saareysaa muhiimadda ay soo jiidanayso, horumarinta, iyo xafidaada dadka kartida-badan iyo shaqaalaha ka go’antahay in qayb kasta oo ka mid ah nidaamka dugsiga, si daas daraadeed Dugsiyada Dadweynaha ee Federal Way waa meesha kartida weyn ay doorato in ay ka shaqeeyso. Waxaan dhisi doonaa heerarka cad oo dhaqan xirfadeed iyo la xisaabtanka leh, oo waxaanu ku bixin doonaa fursado waxbarasho kala duwan oo joogto ah oo macalimiinta, madaxda, iyo shaqaalaha.

4

WANAAJINTA JOOGTADA AH EE XOG-OGAALKA AH

Tiirkeena afaraad wuxuu ku saabsan yahay **“MANAGING THE WHOLE”** habab hormarinaya iskudhafka, hirgelinta edbinta, iyo diirada saaridda hawlahaheena heer kasta. Waxaan go’aamadeena ku gaari doonaa iyagoo ku saleysan xaqiiqda, ma ahan fikradaha. Intaas waxaa sii dheer, waxaan u isticmaali doonaa qiimaynta joogtada ah iyo waqtiyeedka ah si ay ula qabsadaan waxbaridda, waxbarashada, iyo hoggaanka, oo waxaan si joogto ah u hormarin doonaa horumar sida a khlaaqda oo dhan nidaamka dugsigeena.

MUHIIMADA AAN AAMINSANAHAY

- Waxaan aaminsan nahay in arday KASTA uu ku baran karo heerka ugu sareeya.
- Waxaan aaminsan nahay in jinsiyada, dhaqaalaha bulshada, luuqada, asalka dhaqanka, iyo qaar kale waa in aanay noqon qiyaaseyaasha ee horumarka ardayga.
- Waxaan aaminsan nahay in ay ardaydeena lahaadaan cod, waa in ay isu arkaan inta ay wax barayaan, waana in ay is ku xirnaadaan dadka waaweyn oo ayaga wax barayaan.
- Waxaan aaminsanahay waa in waxa aanu maalin kasta fasalka ku samaynayno ay ku yeelanayso saameynta ugu weyn ee waxbarashada ardayga.
- Waxaan aaminsanahay waa in aanusi joogto ah wax u barano oo aan ku korno dhaqankeena haddii aan doonayno in aan la kulano baahida ardayda oo dhan.
- Waxaan aaminsanahay inay qasab tahay inaan si niyad ah u wadashaqayno oo xogta u isticmaalno hagitaan si aan u wanaajino dhaqankeena.
- Waxaan aaminsanahay in qoysaskeena ay yihiin la-hawlgalayaasha muhiimka ah ee waxbarasho ilmo kasta.

ARAGTIDA SARE IYO SINNAANTA

FWPS waxay rumeysan tahay qof walba iyo arday kasta uu leeyahay awood aan xaddidnayn oo ay ka go'an tahay hubinta in dhammaan aqoonyahannada, qowmiyad kasta, dabaqad kasta, asalka luqadda, naafanimada, aqoonsiga jinsiga/muujinta, jihaynta galmada, iyo waxyaabaha kale ee gaarka ah, ay ku bararaan kuna gaaraan heerar sare. Waxaan ku hawlgelin doonaa dhaqamada ka soo horjeeda cunsuriyadda iyo ka mid noqoshada si loo aqoonsado loona tirtiro caqabadaha sababa isku dheelidir la'aanta.

QOF KASTA OO ARDAY AH AYAA:

- Ogow waxay leeyihiin awood aan xaddidnayn waxayna ku gaari karaan heerarka ugu sarreeya
- Si firfircoon uga hawlgal barashada iyo shaqada koorsada
- Lahaanshaha iyo saamaynta barashadooda
- Ka hawlgal joogtaynta wada sheekaysiga dhaqanka iyo isdhexgalka
- La arko, la maqlo, la qiimeeyo, loona dabbaaldego cidda ay yihiin
- Bulsho ahaan iyo shucuur ahaanba ku badbaado dugsiga marka la joogo goobta waxbarashada: manhajka, waxbaridda, dhaqanka dugsiga iyo fasalka, iyo waxqabadyada

QOF WALBA IYO SHAQAALA KASTA WAXAY:

- Qiimee oo ku dar codka ardayga wakiilka
- Ka go'an isku darka isku dhafka wax uqabashada, xog ogaalka ah ee kahortagga cunsuriyadda iyo ka saaridda caqabadaha si loo wanaajiyo barashada ardayda, taasoo horseedaysa kororka guusha
- In la fududeeyo joogtaynta wada sheekaysiga iyo isdhexgalka dhaqan ahaan sii jiraya
- Dareen la arko, la qiimeeyo, oo la maqlo sida xirfadlayaasha iyo shaqsiyaadka
- Soo dhawow, la xidhiidh, oo la wadaag qoysaska si aad ardaygu ugu guulaysato
- Ku noolow qiimaha iyo aaminaadda degmadeena

QOF WALBA IYO QOYS KASTA WAXAY:

- Ogow waa la arkaa, la maqlaa, waana la qiimeeyaa sida shuraakada waxbarashada ardaydooda
- Si dareen leh lagu soo dhoweeyo, ku xidhan, oo aad leedahay macno ah ka mid ahaanshaha dugsiyadeena iyo degmadayada
- Dareen awood si aad ula xiriirto shaqaalaha agagaarka tacliinta ardayda iyo yoolalka qiirada bulshada iyo horumarka
- La siiyo macluumaadka iyo kheyraadka lagama maarmaanka u ah inay taageeraan guusha ardaydooda



ARAGTIYAHEENA

WAXQABAD

XAFIISKA DHEXE

Haddii DHAMMAAN xubnaha xafiiska dhexe ay ku shaqeeyaan farsamooyin ku salaysan sinaan, kuna dhisan cadayn, ka wada shaqeeyaan abuurista iyo in la iska kaashado sidii loo aburi lahaa loona waafajin lahaa nidaamyada taageerada ah ee xogta ku saleysan, abuuraa awooda hogaamineed ee dhaqan ahaanta jawaab-celinta leh, ayna la shaqeeyaan qoysaska iyo xubnaha bulshada oo ah iskaashatadooda

MAAMULAYAASHA

Kadibna, maadaama ay yihiin hogaamiyaasha waxbarashada, DHAMAAN maamuleyaasha ayaa aburi doona dhaqan ku salaysan sinaan oo himilooyin sare leh ayagoo isku xiraaya khayraadka, bixinaaya PD tay sare leh iyo falcelin geesinimo leh oo dhisaysa tayada shaqaalaha si loo dhaqan gasho waxbarasho heerarka ku salaysan, xogtu ay hormuud u tahay, adag, dhaqan ahaana ka jawaabeysa oona ku salaysan codka aqoonyahanka iyo qoyska

MACALLIMIINTA & SHAQAALAHA TAAGEERADA

Kuwaasoo taageeri doona DHAMMAAN macallimiinta iyo shaqaalaha taageerada si ay aqoon qoto dheer ugu yeeshaan, u qadariyaan, ayna kor ugu qaadaan codka arday kasta si loo dhaqan gasho waxbarasho heerarka ku salaysan, xogtu ay hormuud u tahay, adag, dhaqan ahaana ka jawaabeysa kuwaasoo taageeraya waxbarashada tacliinta iyo shucuur bulsheedka aqoonyahannada

ARDAYDA

Taasoo xaqiijin doonta in ARDAY KASTA uu qalin jebiyo asagoo u diyaarsan kuleej iyo xirfad uuna guul ka gaaro heerarka sare, asagoo si firfircoon ula falgalaayo casharo adag, iska dhex arkaaya hanaanka waxbarashada, isticmaalaya codadkooda oona daremayana lahaansho iyo inuu qayb ka yahay goob ilaalinaysa dhaqanka.

*Aragtida Waxqabadka waa SIDA aan u xaqiijin doonno Aragtidayada Sare iyo Sinnaanta FWPS.

hadafyada

cabbirada hor-u-socodka

qaab sinaan ah

1 SANADAHA HORE: DHISIDA AS AASKA

Arday kasta oo caalim ah waxaa uu geli doonaa dugsiga barbaarinta caruurta isagoo diyaar u ah inu barto xirfadaha dareenka-bulsho iyo taas oo horay u kaxeen doona arday kasta si ay ula kulmaan ama ka badiyaan heerarka darajooyinka fasalka ee Cilmiga Luuqada Ingiriisiga (ELA) iyo Xisaabta dhammaadka fasalka 3aad.

Xiliga 2024 boqolkiiba 80% oo ardayda fasalka 3aad way buuxinayaan ama dhaafayaan heerka fasalka ee ELA.

- Boqolkiiba ardayda isku soo diiwaangelisay barnaamijyada dugsiga barbaarinta oo tayada sare leh
- Boqolkiiba ardayda fulineesa heerarka PreK ee gobolka ee aqris-qoraalka iyo xisaabta

* Boqolkiiba tirada ardayda diyaarka u ah xannaanada, sida lagu cabbiray qiimeynta WAKIDS

- Boqolkiiba ardayda fulinayaan heerarka Waxbarashada Dareenka Bulshada (SEL) ee sannadaha hore waxbarashada
- * Boqolkiiba tirada ardayda kulma ama dhaafaya heerarka fasalka ee Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga (ELA) iyo Xisaabaatka dhammaadka fasalka 3aad

Arday kasta oo keensadaa xirfadaha waxbarasho iyo dareenka-bulshada in uu noqdo mid guulaysto fasalka 3aad iyo wixii ka danbeeyo.



2 ILMAHA OO DHAN: SHAKHSIYAAD KOB CAYA, KALSOONI LEH, MASUULLIYAD LEH

Arday kasta waa la xoojin doonaa oo loo diyaarin doonaa si ay u horumariyaan masuuliyadda shakhsi ahaaneed si ay u noqon kuwa fiican, xubnaha wax soo saar leh ee bulshada.

Xiliga 2024 ma jirayaan cadeyn aan kala qeybsaneyn ee xogta edbinta.

Xiliga 2024, boqolkiiba 100% ee aqoonyahanada waxay dareemeen in dugsigooda uu badbaado yahay oo u soo dhaweynayo sida lagu cabiray aragtida sahanka.

* Boqolkiiba tirada ardayda ka qaybgalaya ugu yaraan 90% waqtiga waxbarashada fasalka

* Boqolkiiba tirada ardayda iyo qoysaska ka qaybgalaya shirarka ardaydu-hoggaamiyaan

- Boqolkiiba ardayda ku heleyaan rajooyinka dabecadaha aan-tacliinta ahayn oo ku salaysan heerarka karka warbixinta
- * Boqolkiiba tirada ardayda kuwaas oo dareensan in dugsigoodu ammaan yahay oo soo dhoweynayo sida lagu cabiray sahanka aragtida
- Boqolkiiba ardayda dhamaysta 24 saacadood shaqada adeega bulshada ka hor inta aan qalin jabin

Arday kasta wuxuu ogyahay, fahamsan yahay, oo ogolaanayaa dhaqankiisa / dhaqankeeda u gaar ah iyo dhaqamada kale iyo baahida waxbarashada, si ay u taageeran naftooda iyo dadka kaleba.



3 ARDAYDA FIRFIRCOON: KU HAWLAN, FIKIREYAASHA HALISTA AH OO LA XOOJIYAY

Arday kasta caalim ah waa lala xoojin doonaa lahaanshaha waxbarashadooda waxaana si buuxda logu hawlan doonaa si ay noqdaan mufakiriintii xaaladaha halista ah iyo hal abuureyaasha.

Xiliga 2024, boqolkiiba 100% ee aqoonyahanada way ka qeybgalaan oo la tartamaan sida lagu cabiray aragtida sahanka.

- Boqolkiiba ardayda ku hawlan ugu yaraan hal hawl ka baxsan minhajka
- Boqolkiiba ardayda oo si guul ah u diyaariya oo soo bandhigta mashaariicda dhamaadkii sano guurka

* Boqolkiiba tirada ardayda ku hawlan oo loolan ku jira sida lagu cabbiray sahanka aragtida

- * Tirada shaqaalaha aadka u yaqaana ama ku kala duwan hawlgelinta dhaqamada ardayga, sida lagu cabbiray Xarunta Hoggaanka Waxbarashada 5 qiyaas ee baridda iyo Barashada™ (CEL's 5D) iyo Qaab dhismeedka hoggaanka ee Ururka Maamulayaasha Dugsiyada Washington (AWSP)

Ardayd kasta waxa si firfircoon leh halwlan yahay xaaladaha halista ah iyo fekerka hal abuur leh, hadaf dejinta iyo muujinta kartida aqoonta dhaqan.



hadafyada cabbirada hor-u-socodka qaab sinaan ah

4 AAGGA -KA KOOBAN KARTI DA: AQOON SARE OO MAADDOOYINKA DHAMMAAN

Arday kasta oo wax baranaya wuxuu heli doonaa fursad guul oo siman, wuxuuna la kulmi doono ama ka badin doonaa heerarka natiijada ee maaddooyinka oo dhan dhammaadka fasal kasta.

Marka la gaaro 2024, 80% ardayda fasalka 8aad waxay la kulmi doonaan ama dhaafi doonaan heerarka fasalka ee ELA.

- * **Boqolkiiba tirada ardayda la kulmay heerarka fasalka ee maaddooyinka muhiimka ah, sida lagu cabbiray qiimeynta gobolka**
- * **Boqolkiiba tirada ardayda ee muujinaya aqoonta nidaamka darajeeynta ku saleysan heerarka (ee maado kasta)**
- Boqolkiiba ardayda u diiwaangashan oo dhamaynayaan Algebra ee fasalka 8aad oo qaba celcelis ahaan darajada 3.0
- * **Boqolkiiba tirada ardayda ka qaybgalaya shaqada koorsada sare iyo kasbanayaan darajo lagu gudbo**
- Boqolkiiba ardayda noqodaan kuwa xoogahoo waxbartaan
- Boqolkiiba ardayda la kulmaan heerka ee qiimaynta tirada tixraaca

Arday kasta oo uu yeesho kalsooni dhaqanka sida arday ahaan oo si taxadar leh u isticmaala aqoontiisa/ aqoonteeda iyo xirfadaha u khibrada cusub oo kala duwan.



5 KU DHEGNAASHADA IN UU QALIN JABIYO: QALIN JABINTA DUGSIGA SARE ILAA GUBBIN GUUL AH

Arday kasta wuxuu si guul leh u dhex mari doonaa kala guurka muhiimka ah ee waxbarashadooda, wuxuuna ka qalin jabin doonaa dugsiga sare oo wuxuu diyaar u noqon doonaa kulliyadda, xirfadaha, iyo waayo aragnimada dugsiga sare kadib.

Marka la gaaro 2024, 95% fasalka sare waxay ku qalin jabin doonaan waqtigii loogu talagalay.

- Waqtiga kala guurka laga bilaabo Dugsiga barbaarinta kahor ilaa dugsiga hoose, dugsiga dhexe, dugsiga sare, iyo waayo aragnimada dugsiga sare kadib
- * **Boqolkiiba tirada ardayda fasalka 9aad oo qarka u saaran qalin jabinta oo waqtigeeda kudhacda**
- Kordhinta dhibcaha ardayda imtixaanada laga galo kuleejka (ACT, PSAT, SAT) iyo ASVAB
- Boqolkiiba ardayda qaba waayo-aragnimada STEAM (Sayniska, Teknolojiyada, Injineeriyada, Tacliinta iyo Xisaabta)
- * **Boqolkiiba tirada dadka waawayn ee leh haysta shahaado Qorshe Xirfadeed oo tilmaamaya ugu yaraan mid ka mid ah kuwan: aqbalaadda kulliyadda, militariga, tababarka ganacsiga/ farsamada, shahaadada warshadaha/xirfad shaqo**
- * **Boqolkiiba tirada ardayda dhammaystiray codsiyada deeqaha waxbarasho ee laga helo kulliyada, FAFSA iyo WASFA**
- * **Kordhinta qalin jabinta dugsiga sare iyo hoos u dhaca qiimaha katagidda dugsiga**
- Boqolkiiba ardayda qalin-jabineesa oo sii wata laba sano ama ka badan oo kuleejka oo hela shahaadada kuleejka ama dugsiga sare kadib
- * **Boqolkiiba tirada ardayda ka diiwaangashan shaqada koorsada adag sida lagu cabibiray Tusaha Tacliinta Adag**

Arday kasta – oo bilaabaya xilli hore iyo taageero firfircoon – wuxuu abuuraa/ isticmaalaa qorshe kala guur oo dabacsan, shaqsi ahaan ah aalad lagu hormarinayo waxqabadka tacliimeed, horumar joogto ah xagga qalin jabinta, iyo xirfada wacyigelinta iyo sahaminta.





TILMAAMAHA DEGMADA



HEERKA BUUNDOOYINKA

85%

fasalka 2023, in kasta oo caqabadaha lala kulmay iyo saamaynadii la xidhiidhay COVID.



181

aqoonyahanno ah ayaa helay Shaabadda Aqoon U Lahaanshaha Labo ama in ka badan oo Luuqadood sanadka 2023 - tiradii ugu badnayd abid!

HAL ABUUR

Fursadaha Waxbarashada Xirfadda iyo Farsamada (CTE), oo ay ku jiraan koorrada INCubatoredu ee ardayda ganacsadaha iyo barnaamijka barashada hore

60%

arday kujiray fasalka 2018 waxay iska qoreen barnaamijka kulleejada 2 ama 4-sano ah sanadka ugu horeeya qalin jabinta ka dib

FWPS waxay bixisaa 47 koorso oo u qalma helida kiridhitka dugsiga sare iyo kan kulleejka labadaba ee ardayda dhigata fasalada 9-12 ee sanad dugsiiyeedka 2023-24.

4,443

arday/ aqoonyanno ayaa iska diiwaan galiyay koorsooyinkan lagu helo kiridhitka dugsiga sare iyo kan kulleejka labadaba ee CTE sanad dugsiiyeedka 2022-23.

Wadashaqeyn xoog leh oo lala yeesho ururada bulshada ee taageera ardayda Dugsiyada Dadweynaha ee Federal Way.

WAXOABADYADA STEM

Bixinada waxyaabaha manhajka ka baxsan oo ay ku jiraan robotic-yada, ballaarinta koorsooyinka CTE ee diiradda saaraya STEM, kordhinka, kombiyuutar seyniska loogu talagalay ardayda fasalka saddexaad, iskaashiga STEM, iyo wax kaloo badan.

80%

ardeyda fasalka 2020 ee iska diiwaan galiyay machad 4-sano ah ayaa sii jiray ilaa sanadka koowaad.

2,287

arday oo ka tirsan fasalka 2023 ayaa ku baasay koorrada AP, IB, ama Cambridge sannadkii hore.

990

Shahaadooyinka Ay Aqoonsan tahay Goob-taaliineedka (IRC) ee uu kasbaday fasalka 2023.

68%

aqoonyahannada fasalka 2020 ee iska diiwaan galiyay machad 2-sano ah ayaa sii jiray wixii ka dambeeyay sanadka koowaad.



82%

oo ka mid ah ardeyda fasalka qalin-jabineysay sannadka 2022 waxay qaateen hal ama in ka badan oo ah **koorsada kiridhitka dugsiga sare iyo kan kulleejka labadaba.** Tani waxay ka sarreysaa celceliska qorsho istaraajiyadeedka yooled ee gobolka (tan labbaad ee ugu sarreysa qorsho istaraajiyadeedka yooled ee gobolka).



Dr. Dani Pfeiffer, Kormeeraha Guud

GUDDIGA WAXBARASHADA:

Quentin Morris

Agaasimaha Gudiga Degmada #1

Dr. Jennifer Jones

Agaasimaha Gudiga, Degmada #2

Luckisha Phillips

Agaasimaha Guddiga Degmada #3

Trudy Davis

Agaasimaha Guddiga Degmada #4

Joan Marie Murphy

Agaasimaha Gudiga Degmada #5

21,000+ ARDAY

- 0.4% Hindida Mareykanka / Dhaladka Alaska
- 13.7% Asian
- 15.3% Madoowga/Africanka Maraykanka
- 33.3% Isbanish/Latino
- 6.1% Dhalad Hawayiiyan ah/Kuwo kale Jasiiradda Baasifigga ka soo jeeda
- 11.4% Jinsiyad Labbo ama Ka badan
- 19.9% Cadaan

- 30.4% Luuqado Badan
- 66.4% Bilaash/Qadho La dhimay
- 14.2% Waxbarasha Gaarka ah

37 DUGSI

- 20 Dugsiyada Hoose
- 3 Dugsiyada Tababarka carrurta ilaa iyo fasalka 8
- 6 Dugsiyada Dhexe
- 4 Dugsiyada Sare
- 4 Boggaga Dugsiga ee Kale

107 LUQADOOD

- Ingiriis (13,250 arday)
- Isbanish (3,806 arday)
- Dari (649 arday)
- Yukraynian (401 arday)
- Pashto (356 arday)
- Ruush (338 arday)
- Fiitnaam (249 arday)
- Somali (205 arday)

2,917 XUBNAHA SHAQAALAHA

- 1,634 Macalimiin

AAGAGGA LOO ADEEGAY:

- 35 Miles laba jibbaaran**
- Federal Way
- Des Moines
- Auburn
- Kent
- Aagagga Degmadda King ee aan la aqoonsanayn